# District 196 EduTrak Connect
# Bixinta Kharashka

Raac tilmaamahan si aad kharashka u bixiso adigoo isticmaalaya EduTrak Connect.

Tilmaamaha/Hagitaanada muuqaalka ah ee kale:
Samaysashada Akoon marka ugu horeysa - Af Ingiriisi / Af Somali / Af Isbaanish
Iska diwaangelinta Ciyaaraha Fudud/Waxqabadyada/Farshaxanada Gacanta - Af Ingiriisi / Af Somali / Af Isbaanish

1. Ka gal akoonkaaga Edutrak Connect barta https://district196.cf.edutrakconnect.com/
   Guji linkiga ku qoran bogga kowaad si aad u tagtid bogga galitaanka




2. Tag khidmadaha Ardayga (Astaanta Gaari gacanka cawliga ah). Qaybtan waxaa la arki karaa kaliya marka qofku galo akoonkiisa. Guji gaadhi gacanka wax iibsiga ee ka muuqda qaybta sare ee bogga ama Guji Go by Student Fees (Tag Khidmadaha Ardayga).



3. Waxaad arki doontaa khidmadaha lagu leeyahay ardaygaaga gaar ahaan waxaa lagu qoraa qaybta midigta oo xoogaa ka hooseysa magaca ardaygaaga.  Khidmadahan waxay lahaan doonaan taariikh iyo khidmad. Badhan cagaaran ayaa tilmaamaya in khidmadani ay ku jiro gaadhigaaga wax iibsiga.

   Khidmadaha kale ayaa laga yaabaa in la arki karo si loogu meeleeyo ardaygaaga. Khidmadaha ayaa laga yaabaa in loogu talagalay sheyada sida qorshaha Caymiska Ipadka ama lacagaha lagu aado safarada dibada.  Kharashaadkaa, waxaad gujin kartaa badhanka buluuga ah ee Assign (ku meelee) si aad u doorato inaad bixiso lacagtaas.




Fees assigned to your student show with a price and an assigned date. The button/price showing as green indicates this is in your card and ready for purchase. .

Fees that are available to pay for your child (iPad Protection Plan, Class field trips, etc.), will be listed with a blue Assign button. Click this button to assign to your student.

4. Mida lacag la'aanta ah ayaa laga yaabaa inay kaaga baahato inaad buuxiso foom ka hor intaadan ku darin gaadhiga wax iibsiga. Badhanka ku khidmada ayaa isku beddeli doonaa badhan ay ku qoran Sign Forms (Saxiix Foomamka) oo buluug tikh ah haddii ay jiraan foomam la iska rabo. Guji badhankaas si aad u dhamaystirto foomamka ka dibna guji Yes (Haa)



shaashada kuu soo bixi doontaa.   Foomamku way kala duwanaan karaan iyadoona ku xiran badeecada la iibsaday.




Foomamka u buuxi sida lagaaga baahan yahay.  Soo gudbi Jawaabaha kuna sheyga gaadhiga wax iibsiga.  Xusuusnow, markii sheyga lagu daro gaadhigaaga wax iibsiga, badhanka wuxuu isku beddeli doonaa cagaar.

5. Markaad ku darto sheeyada oo dhan gaadhiga wax iibsiga, ayna diyaar u tahay in la bixiyo lacagta, guji Checkout, si aad u bilowda hanaanka lacag bixinta.




6. Haddii aadan lahayn kaarka kiridhitka ama kaadhka debitka ee ku xiran akoonkaaga, fariintan ayaa kuu soo muuqan doontaa oona ah inaad u baahan tahay inaad sameysato ilo maalgelin. Guji Setup Funding Sources (Ku xidho Ilo Maalgelin). Buuxi macluumaadka kaadhka kadibna guji Save (Kaydi).







7. Haddii il maalgelin horeba ay diyaar u sii ahayd, waxaad dooran kartaa mida aad isticmaalayso (haddii akoonkaaga ku xiran tahay wax ka badan hal). Guji Pay Now (hadda bixi) si aad u dhamaystirto lacag bixinta. Waxaa heli doontaa iimayl rasiid ah.







Hambalyo!   Waxaad dhamaystirtay bixinta kharashaadka ardaygaaga.

Lacagihii hore ayaa laga arki karaa nidaamka adigoo gujinaya badhanka Order History (Taarikhda Dalabka) marka aad joogto bogga Student Fees (Khidmadaha Ardayga).

